Lacagta kaalmada

Waa suurtagal iney qofkasto noloshiisa soo mari karto wakhti gaban ama dheer oo dhaaqalaha ku adkaado. Haddii dhaqliga ku soo gali uusan kugu filneen ama idinku filneen qoyskiina waxaa soo dalbankartiin lacagta kaalmada. Kaalmadas waa mid loo qorsheeyay qoyska iney ka caawiso baahida inta ugu muhiimsan. Ujeedka lacagta kaalmada waa in lagu kaalmeeyo ilaa adiga ka noqoneysid qof dhaqaalo ahaan isku filan. Waxyaabaha muhiimka waxaa kamid ah in adiga isku dayday laakiin xaalada inaa kaliga xalisid ey suurtagali weeyday.

Shuruudaha lacagta kaalmada

Haddii degentahay iyo joogtid Skellefteå oo haysan si kale aad masruufkaada ku soo saaratid waxaa laguu oggolaankara lacagta kaalmada. *Si kale* waxaa kamid ahaan karo inaa codsatid lacago kale iyo lacag gunnad oo suurtagalikarto inaa xaq u leedahay, tusaale ahaan lacagta kaalmeynta kharashka kirada guriga, lacagta kaalmeynt carruurta hal waalid la nool ama lacagta gunnada oo dadka shaqo la'aanta.

Haddii adiga qofkale la nooshahay, is qabtiin ama idiin diwaangalisantahay inaa isla nooshahiin waxaa koow qasab ah in idinka dhaqaalo ahaan is caawisiin.

Haddii lacag bangiga kuu taal ama haysatid hanti kale waxaa qasab ah adiga koow isticmaashid lacagtaas oo masruuf kuu noqoto inta laguu oggolaan lacagta kaalmada.

Adiga oo shaqo la'aanta ah waa qasab inaa iska diwaangalisid xafiiska shaqada haddii aad dooneysid inaa xaq u lahaatid lacagta kaalmada. Haddii aad jirantahay waa in warqad dhakhtar dhawaan kuu qoray haysatid.

Waxaa jiro xad oo ilaa intee oo dhaqli adiga ama qoyskaada soo gali karo oo saameyn haddii aad xaq u yeelaneysiin in kaalmada la idin siiyo. Shaqaalaha markasto wuxuu qiimeyn xaaladaada iyo baahidaada.

Ilaa intee oo lacag baa adiga heli kartaa?

Sida ku qoran sharciga u adeegida bulshada dhammaan waxaa xaq u wada leenahay nolol aqligal inaa noolaano. Qiimeynta waxa ey tahay nolol aqligal waxaa laga tusaale qaadan xeerka qaranka. Xeerka qaranka waxaa go'aamin dowlada Iswiidhan, oo wadanka oo dhan buu khuseeya, uu nidaamin ilaa inta ugu yar lacagta kaalmada ey noqonkarto. Xeerka qaranka waxaa kamid ah tusaale ahaan kharashka cuntada, dharka, is nidaafinta iyo waxyaalaha isticmaalka ku dhammaado. Kharashka guriga kuma jiro xeerka qaranka oo gooni baa shaqsikasto loogu qiimeyn.

Lacagta kaalmada inta ey noqoneyso waxey ku xirantahay waxa ku qoran xeerka qaranka oo qoyska inta qof uu ka koobanyahay iyo kharashyada ka bixi iyo dhaqliga soo gali qoyska.

Maxaa la dooni iney lacagta dheeqdo?

Lacagta kaalmada waa iney dheeqdo kharashyada aqligalka ah: cuntada, dharka iyo kabaha, waxyaalaha isticmaalka ku dhammaado, baashaalka iyo xilliga firaaqada, caafimaadka iyo is nidaafinta, joornaalka, telefoon, kharashka telefiishinka, kirada,

kharashka korontada, kharashka safarada shaqada, ceymiska guriga, ceymiska shaqo la'aanta, kharashka ururka shaqaalaha iyo ceymiska carruurta.

Lacagta kaalmada waa in xita la iskaga bixin karo kharashyada mar marka dhifka la bixiyo tusaale ahaan kharashka telefoonka iyo kharashka joornaalka.

Lacagta kaalmada oo waxyaabaha kale oo nolosha

Lacagta kaalmada waxaa xita lagu bixinkara waxyaabaha kale oo nolosha, tusaale ahaan okiyaale, daryeel ilko, booqasho dhakhtar, daawo, maacuunta guriga iyo waxyaabo kale haddii ey sabab jirto. Intaa waxaa sii dheer fursad aad adiga, qoyskaada ama carruurta ku soo codsankartiin waxkale aad baahi u qabikartiin.

Sidee baa u soo codsankartaa?

Ka soo codso lacagta kaalmada bogga internetka oo www.skelleftea.se/sok-forsorjningsstod

Adiga waxaa ka soo codsankartaa kombiyuutarka, telefoonyada casriga ama kombiyuutarada shaashadaha yar. Adiga waxaa u baahantahay aqoonsiga digitaalka haddii aad dooneysid inaa isticmaashid adeega digitaalka oo meeshaas ka soo codsatid. Markaa digitaal ahaan usoo codsatid adiga waxaa soo galikartaa adeega digitaalka oo meeshaas baa kala soconkarta arrintaada.

Intaa soo codsan ka hore

- Waxaa markasto codsiga ka soo dhirtiin isku hal qof haddii aad tahiin labo qof oo waa weeyn oo isla nool oo isla soo codsan. Haddii ey jirto arrin idiin socoto qofkaas magaciisa codsiga ku soo dirsada.
- Soo uruuriya dhammaan warbixinyada dhaqliga iyo kharashyada intaadan bilaabin inaa buuxisid codsiga digitaalka.
- Adiga codsiga digitaalka waxaa soo dirikartaa halmar bishiiba. Haddii aad dooneysid mar labaad inaa soo codsatid isla bishaas waxaad isticmaali foomka warqada.

Markaa soo codsaneysid

- Waa qasab dhammaan safafka oo foomka digitaalka inaa si sax u wada buuxisid haddii kale ma noo soo diri kartid.
- Haddii aad tahiin labo qof oo weeyn oo isla nool oo dooneysiin inaa isla soo codsatiin lacagta kaalmada waa in labadiina saxiixdiin codsiga markaa dhameystirtiin.

Markaa soo codsatiin kadib

- Adiga waa inaa caddeynkartid warbixinta aad noo soo gudbisid haddii aan ku soo weeydiino.
- Si buuxdo ula soco arintaada markaa noo soo dirtid kadib. Haddii anaga dooneyno warbixin kale waxaan adiga kuu soo diri farriin arintaas ku saabsan. Soo gal meesha adeega digitaalka oo meeshaas baa ka akhrisankartaa farriinaha laguu soo diro.
- Noo soo dir sida ugu dhaqsaha badan waxyaabaha aan dooneyno inaa soo dhameystirtid. Waa suurtagal inaa warbixinadaas ku soo dirikartid kombiyuutarkaada oo soo gal bogga internetka www.skelleftea.se/kontaktasocialkontoret oo soo qor waxa arintaada ey ku saabsantahay, magacaada iyo lambarkada dhallashada.

- Markaa go’aanka gaarno baa adiga ka qeyb-qaadankarta go’aanka iyo codsiga. Taasna micnaheeda waxey tahay in go’aanka warqad ahaan guriga laguugu soo direen. Waa inaa soo gashaa adeega digitaalka sidaa u akhrisankartid go’aankaada.

Soo codso lacagta kaalmada adigoo isticmaaleysid foomka warqada

Waa suurtagal xita inaa codsiga soo suubsatid adigoo isticmaaleysid foomka warqada. Adiga foomka waxaa ka heli bogga internetka oo www.skelleftea.se/blanketter raadi ereyga *Försörjningsstöd*

Ka dacwoonta go’aan

Haddii aadan ku qanacsaneen go’aanka adiga waxaa xaq u leedahay inaa go’aankaas ka dacwoonkartid. Dacwada waa iney ahaato qoraal iyo noo soo gudbisid ugu dambeyn saddex gudahooda laga soo bilaabo maalinta adiga go’aanka ku soo gaaray. Dacwadaada ku soo dir ciwaankaan: *Socialnämnden, Skellefteå kommun, 931 85 Skellefteå*

Guddiga u adeegida bulshada aragtidooda bey ku lifaaqi dacwadaada iyo markas kadib waxey usii diraayaan maxkamada maamulka.

Nala soo xiriir

La soo xiriir xafiiska macaamiisha haddii aad dooneysid warbixin kale:
Soo wac 0910-73 50 00, dalbo 1
E-meeyl iyo bogga internetka www.skelleftea.se/kontakt